



Nidaamku waxyaabaha uusan marna u Dulqaadan karin

Dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay noqdaan kuwo nabadgelyo iyo badbaado leh si jawiga waxbarashaddu u noqdo kuwo saacideya dhammaan ardeydu inay wax bartaan, isla mar ahaantaasna, noqdaan kuwo bulshadda ay ku dhex nool yihiin ee dhaqamada kala duwan leh anfaca. Jawiga badbaadada leh wuxuu aad muhim ugu yahay shaqaalaha iyo ardeyda si wax dhigista iyo waxbarashadda aragti wanaagsan looga qaato.

Guddiga Waxbarashaddu waxay qaateen Nidaamka waxyaabaha aan marna loo dulqaadan karin ee ku saabsan hubka, falalka rabshada leh iyo dagaalka badan. Nidaamkaasu wuxuu qabaneyaa ardeyda dugsiyada dhexe, dugsiyada dhexe-sare iyo dugsiyada sare. Ardeyda dugsiyada sare ee nidaamkaas jebisa ama u gefta dugsiya ayaa laga eryi doonaa iyo waxaana talo ahaan loo soo jeedineyaa in gebi ahaanba dugsiya laga buriyo. Ardeyda lagu arko isticmaalka ama haysashada hubka sharciga darada ah xabsi ayey mutaysaneeyaan.

Hubka, falalka rabshada xambaarsan, iyo dagaalka: Hubka waxaa ka mid ah qoriga (buntukha), mindiyaha, buntukha wax dawakhiya, qoriga soodhka leh, walxaha qarxa, rashka, ama shey kasta oo loo isticmaalo in wax lagu handado ama waxyeelleeyo. Lama oggolaan doono haysashada mindida nooc kasta ha ahaatee (tusaale ahaan mindida jeebka la gashado ama mindida wakhtiga qadada loo isticmaalo goynta subbaga). Walax kasta oo loo isticmaalo in wax lagu hadado waxaa loo qaadaneeyaa inuu hub yahay, xaataa isticmaalkiisa caadiga ah haddii uusan hub ahayn.

Nidaamku wuxuu kaloo qoreyaa in ardeydgii in badan dagaal lagu arko kaas oo geysta dhaawac jidheed waxaa talo ahaan loo soo jeedin doonaan in dugsiya laga buriyo.

Khamriga, tubaakada iyo maandooriyaasha kale: Waxbarashadda Degmadeenu waxay manuuc ka dhigtey inaan khamriga, tubaakada iyo maandooriyaasha kale lagu isticmaalin dhammaan dhismeyaasha dugsiyada, dhacdooyinka la qabaneyo, marka dugsiya lagu sii socdo ama laga soo socdo ama dhacdooyinka uu dugsiya qabaneyo. Ardeyda lagu arko isaga oo iibineya ama haysta walxahan la xadidey ama la manuucay ama haysashada inta la oggol yahay in shakhsi ahaan loo isticmaalo in ka badan, marka koowaad dembigaas waxaa lagu talin doonaa in dugsiya laga eryo, marka laga reebo tubaakada. Haddii ilmahaaga lagu arko isagoo tubaako haysta, marka afraad ee dembigaas waxaa lagu talin doonaa in dugsiya laga eryo.

Shaqaalaha dugsiyada degmadu waxay la-talin doonaan ardeyda la edbineyo iyagoo dhexgal ku sameynaya marka hore ee ay wax dhacaanba. La-talintaas waxaa ka mid ah:

- Si shakhsi ah wax ugu dhigis ama wax u barid
- Waalidka oo shir lala yeesho
- Ku wareejin jaaliyad
- La-taliyaha dugsiya jadwal ballan oo joogta ah uga sameyn

Haddii uua ardeygu jebiyu heshiiska dhexgelista inta aan wax dhicin ee lala galay, ardeygaas dugsiya waa laga eryi doonaa. Haddii ardeygaasu uu mar labaad heshiiskaas u gefo ama jebiyu, waxaa laga yaabaa in lagu qoro barnaamij kale ama dugsi kale.

SOMALI VERSION: ZERO TOLERANCE POLICY 2004

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinada kala xidhiidh: Meeleynta iyo Racfaanka: (619) 725-5660
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneyna qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.